



Soomaaliya waxaa ay leedahay mid ka mid ah kuwa ugu hooseeya nisbooyinka carruurta dhigata dugsiyada aasaasiga ah dunida oo dhan: shantii carruur ah afar ka mid ah ayaan waqtigaan haysan xuquuqda ay u leeyihiin waxbarashada aasaasiga ah. Iskuullada la helo waa ay yar yihiin waxaana ay badiba ku urursan yihiin degaamada magaalooyinka ah. Kheyraadka maaliyadeed ee yar, macalimiinta tababaran iyo agabka waxbarashada oo yar, barokaca iyo kaabayaasha dugsiyada oo liita ayaa xaddidaya fursadaha waxbarasho oo qayb ka qaata in tegista dugsiyadu ay joogsato. Tirada gabdhaha iyo wiilasha dugsiyada dhigtaa ee kala duwan, fursadaha yar ee lagu heli karo tababar xirfadeed iyo shaqo la'aanta ku badan dhallinyarada Soomaaliyeed ayaa sidoo kale weli ah culays weyn.

Dadaalka CISP ee Waxbarashada

CISP waxa waxqabadkeeda waxbarashada ay bilowdey 1992dii, iyada oo u arkeysa in uu tahay mid ka mid ah waxyaabaha mudnaanta u leh mustaqbalka dadka Soomaaliyeed. Habka ay u martey waxaa uu ku dhisan yahay in maskaxda la gashadey in taageero qaabeysan oo joogto ah ay tahay habka keliya ee lagu dhiirrigelin karo waaxda dugsiyada, CISP waxaa dadaal joogto ah ay



ugu jirtey in ay sii waddo hawlaheeda waxbarashada xataa waqtiyada ay maaliyaddu ka kala go'do. Mararka qaar sii wadista mashaariicda waxaa ay ku timid taageero maaliyadeed oo ay

bixiyeen qurba-joogga iyo bulshada Soomaaliyeed (tusaale ahaan [Dugsiga Ceel Dheer](#)). CISP waxaa ay dhab ahaantii aragtey iskaashi aad u heer sarreeya oo kala dhexeeya bulshooyinka degaanka. Xiriir is-aaminaad oo deggan oo soo jireen ah, kuna dhisan dadaal wadajir ah oo ay CISP dhiseysey ku dhawaad 30 sano oo ay dalka ka shaqeyneysey ayaa dhab ahaantii ah mid ka mid ah sababta guushan lagu gaarey.

Khariidadda waxqabadka waxbarashada ee CISP



¹Nisbada Guud ee Carruurta Dugsiyada waxbarashada aasaasiga ah waxaa ay ka hooseysaa 20 boqolkiiba (Somali Joint Need Assessment- 2006).

²Nisbada Guud ee Wiilasha Dugsiyada aasaasiga ah dhigta waa 25% gabdahana waa keliya 15%. Keliya 13% ayaa haween ka ah macalimiinta dugsiyada aasaasiga ah (Somali Joint Need Assessment- 2006).